

## Somaliska

Sida uu sharciga wadanka Iswiidhan dhigayo qof walba oo guriga ku haysta qalabka suurta geliya inuu Tiifii (TV) daawado, waa inuu bixiyaa lacagta khidmada ama kirada Tv-ga oo la siiyo hay'adda raadiyaha ee loo yaqaan Radiotjänst. Mahadi ha ka gaartee lacagtaa khidmada ah ee dadku bixiyo ayaa, Tiifiiga qaranka iyo Raadiyaha qaranka ee Iswiidhan ku sameeyaa barnaamijyo wax barasho oo ka madax banaan iney raad ku yeeshaan siyaa siyiinta iyo hay adaha ganacsiga.

Labadan warbaahineed ee Raadiyaha qaranka Iswiidhan iyo kan Tiifiiga Iswiidhan waa kuwa u adeega shicibka una soo gudbiya warar, dokumenteero, barnaamijyo mada daalo ah iyo kuwo wax barasho ahba.

Qalabka suurta geliya inaad Tiifii (TV) daawato waxa loola jeedaa qalab walba oo kuu suurta gelin kara daawadashada Tiifiiga, sida Tiifii, Fiidiyo, kambiyuutar leh kaarka tiifiiga. Qalabka dhijitaalka ah ee tiifiiga laga daawado iyo qalabka dvd-iiga ee wax lagu duubi karo. Hadii aad kireysato guri leh qalabka suurta gelinaya tiifi daawashada adiga ayaa lagaa doonaya inaad bixiso khidmada ama kirada. Khidmada Tiifiiga, wey ka madax banaan tahay ama lama mid aha, lacagta kale ee aad ku bixiso kanaalada kale ee guriga kuugu jira, sida kuwa dijitaalka ama satalaayd diishka aad ka daawato.

Ama tiifiiga soo kireyso amaba soo deenso waa lagaa doonayaa lacagtii kirada, waxaa kaloo aan macna sameyneyn kanaalada nooca aad daawato mar hadaad qalab tiifii inaad aragto kuu suurta gelinaya aad guriga ku haysato, lacagtii kirada tiifiiga waa lagaa doonayaa oo waa inaad u dirtaa hay'adda raadiyaha ee Radiotjänst-ka loo yaqaan.

Hadii aad haysato qalabkaa tiifii daawashada kuu suurta gelinaya waxaad si fudud isaga diiwaan gelin kartaa rugteena interneetka ee ah:

[www.radiotjanst.se](http://www.radiotjanst.se), ama waxaad kaloo naga soo wici kartaa telefoonkeena macaamiisha ee ah 0771-91 00 04

Amaba noo soo qor warqad adoo noogu soo hagaajinaya adreskeena ah: Radiotjänst i Kiruna AB, 981 80 Kiruna.

Waad ku mahadsantahay bixinta aad bixiso kirada Tiifiiga!

Website in English: [www.radiotjanst.se/en](http://www.radiotjanst.se/en)